

[Astaanta degmada] **DEGMADA TRONDHEIM**

Sida ay degmadu ka yeelayso kharash ka dhaafista xannaanooyinka carruurta iyo SFO-ga

Dawladdu waxay go'aamisay in waalidiintu aanay wax kharash ah ka bixinayn xannaanada carruurta iyo SFO-ga muddada ay adeegyadu xiranyihiin.

Kharash ka dhaafistaa waalidiintu waxay khusaysaa dhammaan carruuraha xannaanada carruurta iyo SFO-ga, oo ay iyana ku jiraan kuwa haysta deeqda lagu saleeyey xeerka goonida ah ee khuseeya carruuraha waalidiintoodu hayaan shaqooyinka aanay bulshadu ka maarmin iyo carruuraha u baahan daryeelid gaar ah.

Degmada Trondheim waxay waalidiinta/mas'uuliyiinta carruuraha xannaanooyinka carruurta iyo SFO-ga ee degmada ka codsanaysaa inay bixiyaan jiiryooyinka hore u soo gaaray. Jiiryooyinka imandoona ayaa laga jarayaa inta meelmood ee ay meelahaasi xirnaayeen. Dadka aan sabab dhaqaale u bixin karayn, waxaa laga codsanayaa inay la xiriiraan Fagenhet for oppvokst og utdanning (Unugga qaabilsan waxbarashada iyo barbaarinta).

Xannaanooyinka carruurta ee birifaatiga ahi iyagaa jiiryooyinka soo dirta taas daraadeedna waxaa waalidiinta laga codsanayaa inay la xiriiraan isla xannaanada carruurtooda si ay u helaan macluumaad khuseeya jiiryooyinka iyo kharash bixinta muddadaan laga hadlayo.